ISMAAMULKA
SAN DIEGO



BARNAAMIJKA ILAALINTA WARAHA BIYAHA

# Maamulka Agabka iyo Jawaab celinta daadashada



waan
**difaaci karnaa**
**marinadeena biyaha**

ayadoo la qaadayao keliya
**dhawr talaabo.**

Barnaamijka *Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego* ayaa ka taageeraaya ganacsiyada dedaaladooda kahortaga wasaqda asagoo siinaaya Farsamooyinka ugu fiican ee Maamulka Biyaha Daadka (BMP-yada).

**!** Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, mijaroorada, iyo biyaha daadka roobka ee Ismaamulka San Diego AYAAN LA DAAWAYN kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, webiyada, iyo badwaynta. Dhammaan ilaha wasaqda ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka. ***Tilmaamahaan ku saabsan maaraynta agabka iyo waxyaabaha daata ayaa naga caawinaysa nadiifinta marinadeena biyaha.***

## Xaraynta Agabka

- Difaac oo dabool dhammaan aagaga kaydka qalabka.
- Ku hay dhamaan agabka kaydinta zaalad wanaagsan, oo qasacyada si amaan ah u dabool marka aan la isticmaalayn.
- Kormeer ku samee aagaga kaydka ugu yaraan halmar kahor xili roobaadka (caadiyan Oktoobar-Abriil) iyo afar jeer inta lagu jiro xili roobaadka.
- Qor natiijooyinka kormeerka oo hay diiwaannada muddo labo sano ah.
- Inta lagu jiro rarista, si amaan ah ugu xaree qalabka iyo agabka oo dhan gaariga.

## Wasaqda Khatarta ah

- Geli oo qashinka ugu dar dhammaan agabka khatarta badan si waafaqsan Xaashiyada Xogta Badqabka (SDS) iyo sharciyada iyo xeerarka quseeya.
- Waydii adeeg bixiyaasha, shaqaalaha, iyo loo shaqeeyaasha agabka ay ku yar tahay sunta ee wali waxtarka leh.
- Ka dhig dhammaan aagaga maamulka, kaydka, iyo fogaynta wasaqda ee dareeraha khatarta ah meel ka fog marinnada biyaha roobka ama kaydadka biyaha.

*tilmaamo dheeraad ah* > > >

***Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater ee WPO.***

JANAAYO 2022



## Wasaqda Khatarta ah

- Ku xaree wasaqda khatarta ah gudaha ama daboolka kor u qaadan iyo hoosta meel daboolan.
- Kaydi wasaqda khatarta ah adoo adeegsanaaya qaababka xakamaynta dheeriga ah (tusaale, gidaarka, rakada waxyaabaha daata, ama qasaca qashinka ee daboolan).
- Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha Waaxda Agabaka Khatarta Badan ee Ismaamulka San Diego, fadlan wac (858) 505-6880.

## Waxyaabaha daata

- Ku hay qalabka iyo agabka muhiimka u ah kahortaga daadashada mid ilaalsan oo meel dhow lagasoo qabsan karo. Ku soo dhaji boorar si aad u xasuusiso shaqaalaha goobaha qalabka lagu nadiifiyo waxyaabaha daata.
- Si joogto ah u nadiifi wasaqda iyo waxyaabaha daata marka ay dhacaan.
- Marka aad xaaqayso, kala saar dhammaan agabka dib loo warshadayn karo.
- Adeegso oo hayso baafafka waxyaabaha daata qabta oo hoos yaala qalabka dhashuumaaya; dib u adeegso dareeraha.
- Adeegso roogaga ama agabka dib loo sifayn karo si aad ugu nadifiso waxyaabaha daata.
- Adeegso agabka qabta waxyaabaha daata marka aadan helin qaabka soo qabashada. Ka saart qashinka daata agabka dib loo isticmaali karo iyo kuwa qashinka lagu daraayo.
- Xir aaga si aad u nadiifiso waxa daata si fudud.
- Si sax ah u nadiifi agabka la isticmaalay si waafaqsan dhammaan sharciyada iyo xeerarka quseeya.
- Agabka khatarta ah ee daata waa in loosoo sheegaa Waaxda Agabka Khatarta ah oo aad ka wacayso (858) 505-6673.
- Xakamee dhammaan waxyaabaha daata ee goobta. Isla markaba u sheeg wax kasta oo daata ama dilaaca oo gaaraaya nidaamka daadka biyaha adoo wacaaya Laynka Biyaha Daadka oo ah (888) 846-0800.

**!** Ku siidaynta wasaqda si toos ah ama si dadban Daadka biyaha ama marinnada biyaha ayaa kasoo horjeeda Xeerka Difaaca marinnada Biyaha ee Ismaamulka (WPO). ***Ganacsigaaga waxaa laga doonayaa inuu ku dhaqmo WPO iyo shuruudaha kore ee ugu yar ee BMP-yada.***

# waad ku mahadsan tahay

**inaad doorkaaga ka qaadatay difaacida kanaaladeena biyaha.**

***Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater ee WPO.***

JANAAYO 2022